

**Muhiim ah: Macluumaad wakhti xasaasi ah oo ku saabsan adeegahaaga.**

HOME AND COMMUNITY SERVICES (HCS)  
AREA AGENCY ON AGING (AAA)

**Ogeysiiska Adeegga Mashruuca Bedelida Medicaid  
Medicaid Transformation Project Service Notice**

**Client Name and Address**

Taariikhda Oggaysiiska:

**Khulaasada Adeegaha**

Oggaysiiskan wuxuu kuu sheegayaa waxyaabaha ku saabsan adeegahaaga. Sidoo kale wuxuu kuu sheegayaa waxyaabaha ku saabsan xaqaaqa aad u leedahay rafcaan.

**Akhri faah-faahinada hoose. Waxaa dhici karta in aad u baahatid in aad qaadid tallaabo.**

Wakaalada Meesha ee ku saabsan Da'weynaanta waxay qaadanaysaa tallaabada(tallaabooyinka) soo socda ee ku saabsan adeegahaaga ama codsiga loogu talagalay adeegaha. Tallaabada(tallaabooyinka) soo socda waxay ka dhaqan geli doonaan marka ay tahay ilaa .

Tallaabada	Barnaamijka	Ficilka	Qaybta	Tirada lacagta

**Tallaabadan waxaa laga qaaday maamul kasta oo soo socda:**

WAC 388-106-19 \_\_\_\_\_

Waxkale: \_\_\_\_\_

**Haddii aadan oggolayn tallaabada oona doonaysid in aad rafcaan ku samaysid, waxaad u baahantahay in aad oggaatid:**

- Qaali Maamul Sharci ayaa dhagaysan doona rafcaankaaga.
- Waxaad haysataa 90 maalmood oo laga joogo taariikhda oggaysiiskan aad heshid si aad rafcaan ugu samaysid go'aanka.
- Waxaad u codsan kartaa dhagaysi adiga oo la xiriira maamulaha kiiskaaga. Sidoo kale waxay ku siin karaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hawsha rafcaanka.

**Macluumaad ku saabsan Rafcaanada**

**Wax lacag ah miyay iigu fadhidaa haddii aan rafcaan ku sameeyo joojinta ama jerista adeega oona waayo dhagaysiga?**

- Waxaa dhici karta in aad dib ugu bixisid DSHS qiimaha adeegaha aad qaadatid inta aad sugaysid go'aanka dhagaysiga. Tirada lacagta waxay noqon kartaa wax ka baddan qiimaha 60 maalmood oo adeego ah uu ka joogo DSHS.
- Xusuusin gaar ah oo ku saabsan dheefaha caafimaadka: Haddii ay adeegahaan u dhammaanayaan sababtoo ah dheefaha caafimaadka ayaa dhammaaday, waxaa dhici karta in aad dib ugu bixisid DSHS adeegaha lacagtooda la bixiyay laga soo bilaabo maalinta ay dhammaadeen adeegaha caafimaadkaaga.

**Maxay yihiin xuquuqahayga kahor iyo marka la joogo dhagaysiga?**

- Waxaad haysan kartaa qofkale oo adiga ku matala.
- Kuma matalayo qof ka socda dhinaca DSHS.
- Waxaa la heli karaa caawimaad sharciyeed. Wac 1-888-201-1014 si aad u heshid macluumaad dheeraad ah.
- DSHS lacag ma siinayso qof kale si uu adiga kuu matalo.
- Waxaad fiirin kartaa faylkaaga DSHS. Waxaad haysan kartaa nuqulo bilaash ah oo ku saabsan faylkaaga DSHS haddii aad codsatid.
- DSHS kuma siin karto macluumaad khaas ah oo ku saabsan macamiisha kale.
- Mararka qaar DSHS kuma siin karto macluumaad lagu ilaaliyay sharciga.
- Waxaad heli doontaa nuqulo ku saabsan dhammaan macluumaadka DSHS ay isticmaasho si ay go'aanka u qaadato.
- Waxaad ka codsan kartaa qaaliga in uu fiiriyo dukumeentiyo kasta oo aad haysatid.
- Waxaad ka markhaati furi doontaa meesha dhagaysiga uu ka dhacaayo.
- Waxaad haysan kartaa markhaati ka markhaati furta meesha uu dhagaysigu ka dhacaayo.
- Waxaad codsan kartaa su'aalaha markhaatida DSHS.

MAGACA MAAMULAHA KIISKA	LAMBARKA TELEEFONKA ( )	CINWAANKA BOOSTADA
CINWAANKA MAAMULAHA KIISKA		